Diseembar 16, 2024

# Saqafyada Dhalada Farsamada Burburtay DCSD CIO ee Howlgabka ah

Waxay aheyd daqiiqad bedeshay aragtida Monika Davis ee shaqadeeda iyo malaha mustaqbalka gabadhaas yar.

Dhowr sanno kahor, Davis, oo ah Madaxa Sarkaalka Warbixinta ee dhawaan shaqada ka fadhiistay (*CIO*) ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (*DCSD*), ayaa ka qeybgaleysay bandhiga tejnoolijiyada Degmada. Waqtigaas, waxay weli aheyd qof aan la garaneyn oo ka dambeeya kaabayaasha jejnoolijiyada ballaaran ee dugsiga degmada saddexaad ee ugu weyn Georgia. Iyadoo dhex taagan wajiyo badan oo aad u xiiseeya, ayaa waxaa u yimid arday Afrikaan Ameerikaan da'yar oo dhawaan ogaatay in CIO - sarkaalka ugu sareeya dhinaca tejnoolijiyada Degmada - waxay aheyd haweeney Madow ah.

“Dadka maysan ogeyn inaan ahaa CIO sababtoo ah maysan filaneyn in haweeneey Madow ah ay noqoto CIO,” Davis ayaa sheegtay. “Waxaa joogay qaar ka mid ah ardayda, oo waxaa jirtay gabar yar oo Madow ah, oo sida shukulaatada sideydoo kale ah. Waxay i weydiisay haddii aan qaabilsannahay dhammaan tejnoolijiyada dugsigoo dhan. Waxay tiri, ‘Wow! Maanan ogeyn in gabdhaha Madowga ah ka howlgalaan tejnoolijiyada.’ Waxaan u sheegay in gabdhaha Madowga ay sameyn karaan wax walba uu qof walba sameyn karo. Waxay tiri, ‘Mahad sannid, taas ayaan sameynayaa,’ oo ka gudub.”

Isdhaafsigaas kaliga ah, Davis ayaa aragtay awooda matalaada.

Sida waafaqsan CIO.com, kaliya boqolkiiba 3.7 oo dhammaan boosaska CIO ee Mareykanka waxaa ka buuxo hogaamada Black IT**,** iyo xattaa qeyb yar ayaa ka ah dumar. Haddana way jirtay, iyadoo hogaamineysa isbedelka dhijitaalka ee nidaamka ugu weyn ee dugsiga, taasoo cadeyn u aheyd gabadhaas yar in goobta hogaaminta tejnoolijiyada ay sidoo kale u furneyd iyada.

Davis ahaan, shaqada waxay ku bilowday sida safar shaqsi ah. Wax soo saarka DCSD lafteeda, waxay ka qalinjabisay Dugsiga Sare Redan 1989, iyadoo horayba ugu fiicneyd lambareynta, xisaabta kumbuyuutarka, iyo naqshadeynta sawirka. Waxay baratay Sayniska Kumbuyuutarka Machadka Tejnoolijiyada Georgia oo muddo sadex sanno ah ka hor intaysan ogaanin wacitaan cusub: la shaqeynta ardayda.

Waxaa ku dhiirogeliyay hooyadeed, bare Degmada ah, Davis waxay u gudubtay Jaamacada Gobolka Georgia, waxay dhammeysatay shahaadadeeda cilmiga bulshada, oo waxay ka qaadatay boos howlwadeenka DCSD. Waxay markiiba ogaatay in fasalka yahay dhul barwaaqo ah taasoo loogu xilsaaray labo shaqo oo ay jaceshahay: Tejnoolijiyada iyo Waxbarashada.

“Sida howlwadeen ahaan, waxaan galay waxbarashada. Waxaa ii suurtogashay inaan la shaqeeyo ardayda oo aan weli ku lug lahaado jacelkeyga koowaad- tejnoolijiyada,” ayay tiri.

Davis ayaa horay usii kordhisay xirfadaheeda, iyadoo ku taqasustay tejnoolijiyada dugsiga ee Dugsiyada Gobolka Fulton iyo markii dambane ay kasbatay shahaadooyinka Tejnoolijiyada Waxbarashada iyo Hogaaminta Waxbarashada. Waxay kadib ku soo laabatay DCSD, iyadoo ka soo kacday taqasuska jetnoolijiyada waxbarashada ee doorarka masuuliyada sii kordheysa.

Waxay qadarisaa hoggaamiyayaasha sida Ramona Tyson, naagtii ugu horeysay ee Madow CIO ee DCSD, iyadoo ku dhiirogelineyso inay si kalsooni leh u gasho jagooyinka maamulka.

“Waxay aheyd jiheeye cajiib ah oo waxay iga caawisay inaan horay u socdo,” Davis ayaa tiri.

Horaantii, waxay maamushay *IGNITE U*, oo ah bulsho wax barasho xirfadle ah oo u heelan isdhaxgalka ka qeybgalka tejnoolijiyada iyo wax ku oolka. Dadaalkaan horay u fikirka ayaa saadaalinaya hormarka aan joogsiga laheyn ee tejnoolijiyada iyo baahida barayaasha ay ugula qabsadaan si aan kala go laheyn.

“Waa inaan yeelanaa qaab aan sare ugu qaadno isdhexgalka tejnoolijiyada oo qaab joogto ah sababtoo ah tejnoolijiyada way isa sii badeleysaa, dadka way isa sii badelayaan, ardayda way isa sii badelayaan,” Davis ayaa tiri.

Waxay ugu dambeyntii hogaamisay dadaalada waxbarashada fogaan aragga ee Degmada oo waxay dib u habeyn ku sameysay *Machadka FLEX*, taasoo muujineysa awoodeeda ay ku qaabeyso hababka waxbarashada dhijitaalka. Laba jeer, waxay u soo gashay sida ku meel gaarka CIO, oo Davis ayaa hogaaminta si joogta ah u qaadatay markii booska CIO uu furmay inta lagu jiray bilowga cudurka safmarka COVID-19..

Waxay aheyd howl adag - iyadoo maareyneyso xudunta Degmada ee waxbarashada fogaan aragga iyadoo si isla mar ah ay dib ugu habeyneyso kaabayaasheeda dhijitaalka. Weli Davis iyo kooxdeeda way kobceen, iyagoo ku hagayo DCSD dhinaca caqabado aan horay loo arag.

“Ma jiro dugsi degmo iyo qof u diyaarsanaa cudurka safmarka. Waxay aheyd inaan si joogto ah u wareejino laakiin sidoo kale aan horay u sii wadno si aan u aragno meesha aan u baahannahay," ayay tiri. “Si kastaba ha ahaatee, waxay xoojisay kala qeybsanaanteena, oo si fiican ayaan nafteena u fahannahay. Waxaan ku jirnaa meel aad u fiican maanta.”

Diiradadeeda waxay ku qotomantahay waaya aragnimada ardayga. Davis way fahamsannatahay in barnaamij walba, aalad, iyo illaha dhijitaalka ay ugu dambeyntii qaabeeyeen sida ardayda wax u bartaan oo ay uga qeybgalaan caalamka.

“Dhammaadka maalinta, Monika, waxay uga dhigantahay farbarashada dhijitaalka," ayay tiri. “Iyadoon laga eegin waxa aan sameyneyno, waa inaan dhammaanteen ka faa'ideysanaa inaan tejnoolijiyada bulshada geyno heerka xigga. Taasina waxay aheyd mid ku jirtay wax walba oo aan ku sameeyay xirfadeyda.”

Intii ay ku jirtay xilkeeda, Davis waxay sheegtay inay la kulantay caqabadaha tejnoolijiyada, isir naceyb qoto dheer oo bani aadminimo ah iyo falalka jinsiga ku saleysan, iyo shakiga asxaabta iyo iibiyayaasha. Waxay aheyd mid aan niyad jabin oo aan rukuuceyn, iyadoo og in joogitaankeeda

iyo guusha ay ka gaartay doorka ay muhiim tahay, gaar ahaan ardayda aanan weli ogaan baaxada buuxdo ee filashadooda.

“Waan jeclahay tartan fiican sababtoo ah waxaan marwalba u kacaa munaasabada,” ayay tiri. “Looma baahno inaad iga heshid ama inaan ku jiro doorkaan, laakiin waa inaad fahamtaa inaan halkaan u joogno carruurta. Meel fiican ayaan joogaa haddiiba diirada ay iyaga tahay oo shaqadana la qabanayo.”

Davis ayaa dhawaan gashay hawlgab Nofeembarta 30, 2024, kadib markii ay dhameysay xirfad sadex toban sanno kala duwan oo ay hageyso mabda’a fudud oo xoogan: *Ardayda Marka koowaad*. Waxay nafteeda u hurtay hubinta in waxbarashada dhijitaalka ay aheyd aalaD waxtar leh, loo heli karo arday walba oo DCSD ah. Iftiinkaas hagayo waa waxa hogaaminta Degmada ay aad ula dhaceen.

“In kastoo aan la shaqeeyay iyada kaliya waqti yar oo sannad ka badan, waan garanayaa in Monika ay aheyd tiir dhexaadka ka go’naanteena hal abuurka, oo ku hagayo Dugsiyada DeKalb dhinaca isbadelada isbadelka ee jenoolijiyada oo la hubinayo in dugsiyadeena ay u qalabeysanyihiin mustaqbalka,” waxaa yiri Kormeeraha Guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton.

“Waan uga mahadcelineynaa iyada tabarucaadeeda badan ee ay ku geyso DCSD Heerarka Cusub iyo Dhirir Cusub, oo waxaan u rajeyneynaa wanaagoo dhan oo howlgabkeeda ay u qalanto.”

Howlgabka, Davis waxay sii wadeysaa inay inay ku biiriso kartiyadeeda tejnoolijiyada waxbarashada, iyadoo ka taageereyso DCSD iyo degmooyinka kale siyaabo cusub. Waxay gadaal uga tagtay kaabayaal hormarsan, xeeladaha waxbarashada dhijitaalka cusub, iyo dhaxalka matalaada, suurtagalnimada, iyo rajo.

“Waxaa jira shaqo badan oo la qabanayo oo ku saabsan tejnoolijiyada waxbarashada, oo waan dareemi karaa inaan ku deeqi karo tallo iyo taageero oo xaafada dhijitaalka, ayay tiri. “Tan waxay ii ogolaaneysaa inaan caawiyo oo u taageero Degmada si ka duwan.”

Davis waxay rajeyneysaa in dhaxalkeeda lagu qeexo u adeegida carruurta iyo sameynta buundo u dhaxeysa waxbarashada iyo tejnoolijiyada. “Waxaan sidoo kale rabay inay dadka dhahaan inaan si adag u shaqeeyay sababtoo ah waan sameeyay," ayay tiri. “Aad ayay iiga go’neyd oo daacad u ahaa ardayda, Degmada, iyo waxa aan qabaneyno. Waxaan sidoo kale rajeynayaa in dadka ay dhahaan inaan isu soo dhaweeyay tejnoolijiyada iyo waxbarashada.”

Gabadha yar oo mar tiri, “*ma garaneyn in gabdhaha Madowga ah ayaa dhaafi karto tejnoolijiyada*,” Monika Davis ayaa weli ah xasuusin xoogan oo ah in matalaada ay muhiim tahay, saqafyada way jajabi karaan, iyo dhammaan ardayda waxay ku dadaali karaan jid walboo ay doortaan.

XXX